Government of **Western Australia**
Department of **Health**
Public and Aboriginal Health Division

Barnaamijka Tallaalka Dugsiga ku Saleysan Fasalka 10 Meningococcal ACWY ee 2019

Waa maxay cudurka Meningococcal?

Cudurka Meningococcal ma aha mid guud, laakiinse marmarka qaarkood waa jiro nafta goynaysa. Cudurku waa natiijada infekshinka bakteeriyada dhiiga iyo/ama maqaarka lafdhabarta iyo maskaxda isku xira.

Inkastoo lagu daaweyn karo antibiyootig, infekshinku wuxuu u gudbi karaa si dhakhso ah, saa daraadeed waa muhiim in cid kasta oo isku aragta calaamadaha cudurka meningococcal inay doonato daaweyn isla markiiba.

Wakhti kasta, ugu dhowaan boqolkiiba 10 dadka caafimaadka qabaa ayaa ugu sida bakteeriyada meningococcal ka si aan dhib lahayn sankooda ama cunahooda oo aan jiran.

Sidee baad u qaadeysaa cudurka meningococcal?

Bakteeriyada Meningococcal waxaa faafiya waxyaalaha ka soo baxaya neefsiga (qufaca, hindhisada ama dhunkashada). Bakteeriyadu kuma sii noolaato jewiga wax ka badan ilbiriqsiyo yar.

Cudurka wuxuu aad ugu dhow yahay in lagu faafiyo dadka aadka kuugu dhow, sida dadka aad isku guriga ku nooshihiin carruurta dhigata xannaano maalmeedka isku midka ah wax ka badan afar saacadood oo xiriir ah.

Waa maxay sababta Caafimaadka WA u dhaqangelinaysaa barnaamijka tallaalka ee loogu talagalay ardeyda fasalka 10-aad?

Dhowaan waxaa jiray korarka infekshinka meningococcal ee uu dhaliyo nooc gaar ah oo bakteeriya ah, 'serogroup W'.Cudurka Meningococcal wuxuu saameyn karaa koox da'eed kasta. Si kastaba ha ahaatee, qaar ka mid ah heerarka ugu sareeya ee qaadista meningococcal iyo jiradu waxay ka dhex dhacaan dhalinyarada iyo koox da'eedkanina wuxuu gudbin karaa bakteeriyada dadka khatarta qaadista infekshinku sareeyo, oo ay ku jiraan carruurta yar yar.

Waxaa la rajeynayaa in tallaalida ardeyda Fasalka 10aad ay yareyn doonto u gudbinta bakteeriyada kuwa kale oo ay ka caawiyaan ka hortaga infekshinka bulsha weynta dhexdeeda.

Tallaalkeebaa la isticmaalayaa sidee buuna wax ku ool u yahay?

Tallaalka Meningococcal ACWY ayaa la isticmaali doonaa. Tallaalkan wuxuu ilaalinayaa afarta serogroups ee bakteeriyada meningococcal : A, C, W and Y. Tallaalka brand Nimenrix® ayaa loo isticmaali doonaa barnaamijkan dugsiga ku saleysan.

Tallaaladan waa kuwo ammaan ah oo wax ku ool ah. Barnaamijka tallaalka Meningococcal ACWY waxaa lagu dhaqan geliyey dhalinyarada jirta 13–15 sanno ee UK ilaa 2015 iyo dhalinyarada jirta 11–12 ee US ilaa 2005 oo aan wax weyn oo lagu soo sheegay lahayn. Tallaalka waxaa loo bixiyaa si joogta ah doose hal mar ah. Doosooyinka dheeraadka ah ayuu lagula talinayaa kuwa khatarta korortay ugu jira cudurkan iyo kuwa u safraya meesha uu cudurkani ku badan yahay. Daraasaadku waxay muujiyeen in wax ku oolnimada tallaalada meningococcal ACWY inay u dhaxeyso boqolkiiba 80–85 dhalinyarada.

Yaan qaadaneynin tallaalkan?

U sheeg qofka tallaalka bixinaya haddii:

- **aad leedahay xasaasiyad naf ka qaadleh, oo daran.**

  Haddii aad lahayd falcelinta xasaasiyad naf ka qaadid ahI ka dib tallaalka dooskii hore ee meningococcal ACWY, ama haddii aad qabto xasaasiyad daran qayb kasta oo ka mid ah tallaalkan , waa inaadan qaadan tallaalkan. Adeeg bixiyahaaga ayaa kuu sheegi kara wax ku saabsan tallaalka waxa laga sameeyey.

- **aad uur leedahay ama naas nuujinaya.**

  Tallaalada Meningococcal si joogta ah looguma talinayo dumarka uurka leh ama naas nuujinaya laakiinse waa la siin karaa meeshii shaybaar la tilmaamay. Fadlan si dheeraad ah ugala hadal GP gaaga haddii aad uur yeelan karto ama naas nuujinayso.

Waa maxay waxyeelada tallaalku?

Wixii daawo ah, oo ay ku jiraan tallaalo, waxaa jirta fursad guud oo fal celin xun leh. Kuwani badanaa waa kuwo fudud oo iyagu iska baaba'a. falcelino khatar ah ayaa sidoo kale suurtogal ah, laakiinse dhif ah. Waxaa jira fursad aad u fog oo uu tallaalku uu ku dhalinayo dhaawac khatar ah ama dhimasho. Kuguma dhici karo infekshinka meningococcal ee tallaalka ka yimid.

Dhacdooyinka guud ee xun xun waxaa ka mid ah xannuunka, casaanka iyo bararka goobta tallaalka, xumada, xanaaqa, xurdada, rabitaanka cuntada oo hoos u dhaca, madax xannuun, finnan iyo lalabo. Si kastaba ha ahaatee, dhacdo daran oo khatar ah oo guud waa dhif.

Ammaanka tallaaladeena had iyo goor waa lala socdaa. Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo: www.tga.gov.au ama www.immunise.health.gov.au

HealthyWA
healthywa.wa.gov.au

Dukumiintigan waxaa lagu diyaarin karaa qaab kale oo bedel ah haddii uu codsado qof iin leh.

Ka waran haddii uu jiro falcelin khatar ah – maxaan raadiyaa?

Raadi waxaad saluugto, sida calaamadaha falcelinta xasaasiyada daran, xumad aad u sareysa, ama dabeecad aan caadi ahayn. Calaamadaha falcelinta xasaasiyada daran waxaa ka mid noqon kara nabarada, bararka wejiga iyo cunnaha, neefsiga oo adkaada, wadnaha oo aad u garaaca, wareer iyo daciifnimo – badanaa daqiiqado yar gudahood ilaa saacado yar tallaalka ka dib. Wixii falcelin daran ah, wac ambalaasta ama aad waaxda xaalada degdega ah ee kuugu dhow.

Maxaan sameeyaa?

Paracetamol wuxuu caawin karaa inuu yareeyo xumada yar ama xannuunka iyo maro la qabooyiyey oo la qooyey waxay sidoo kale yareysaa xannuunka goobta cirbada. Fadlan doono tallo caafimaad ama aad waaxda xaalada degdega ah ee xaafada haddii aad yeelato wax falcelin ah oo ay kula tahay inuu khatar yahay ama waxaan la fileyn.

Ama ka wac ***healthdirect Australia*** 1800 022 222.

Falcelinada waa in loo sheegaa Dul ka ilaalinta Amaanka Tallaalka Dawlada Australia (WAVSS). Tallaal bixiyahaagu waa inuu soo xareeyaa warbixintaan, ama adigaaba sameyn kara adoo maraya website ka WAVSS www.wavss.health.wa.gov.au ama 9321 1312 8.30 subaxnimo– 4.30galabnimo maalmaha shaqada ee toddobaadka.

Wixii macluumaad dheeraad ah

Haddii aad qabto wax weydiimo ah oo ku saabsan tallaalada meningococcal, kala xiriir ***healthdirect Australia*** 1800 022 222 ama adeeg bixiyahaaga adoo isticmaalaya faahfaahinta xiriirka ee galka dhiniciisa dambe ku qoran oo ka kooban waraaqahaagii ka raali ahaanshaha.

Waxaa soo saaray Agaasinka Kontoroolka Cudurada Lays qaadsiiyo
© Wasaaradda Caafimaadka 2019

Xuquuqda qalabkan waxa lagu aaminey Dawlad Goboleedka Galbeedka Australia ilaa si kale la tilmaamo meeyee. Ka sokow macaamilka cadaalada ah oo ujeedadiisu tahay waxbarasho gaar ah, cilmi baaris ,wax ka sheegid ama dib u eegis, siduu ogol yahay ee waafaqsan *Xeerka Xuquuqda 1968* wuxuu bixinayo, qaybna dib looma daabici karo ama looma isticmaalayo ujeeda kasta oo jirta si kastaba ha ahaatee iyadoon laga heysan ogolaansho qoraal ah Gobolka Galbeedka

IMM-013356 JUN'19